



Dhisidda Qorshahaaga Xakamaynta Cayayaanka

Haddii aad doonayso in aad samaysato meel lagu cunteeyo oo kor ka furan, shuruucdu waxay kaaga baahan yihiin in qorshe aad ku xakamaynayso cayayaanka ay kuu ansaxiso waaxda caafimaadka deegaankaagu kahor inta aadan shaqada noocaan ah bilaabin (OAR 333-150-0000, Cutubka 6-202.15). Tilmaamaha/su'aalaha hoose waxay kaa caawin doonaan in aad samaysato qorshe aad cayayaanka uga xakamaynayso goobtaada iyo sidaa si lamid ah la bilaabidda hannaanka wada xaajoodka waaxda caafimaadka deegaankaaga.

1. Samee sawir muujinaya qaabka aad u furi doonto goobtaada si ay u bixiso waaya aragnimo ku saabsan goob cunto oo bannaanka ah.
2. Qaabkee ayaad u ilaalin doontaa goobaha loogu tala galay diyaarinta iyo kaydinta cuntadaada marka goobtu leedahay goobo u furan deegaanka banaanka ah? Tusaale ahaan, isticmaalka mishiinada hawada ka nadiifiya cayayaanka, dhaska iyo dikhawga "air curtains", marwaxadaha, shaashadaha, iwm...
3. Ma u qorshaysay qof masuul ka noqda in uu si joogto ah u kormeero goobaha u furan banaanka marka goobtaadu qaabkaan u shaqaynayso?
4. Ma haysataa liiska waxyaabo la hubinayo oo shaqaalahaaga aad goobta u xilsaartay isticmaali doono marka uu kormeerayo goobaha u furan deegaanka banaanka ah, liiskaasoo ay kujirto inta jeer ee uu goobta qiimaynayo?
5. Waa maxay jadwalkaaga nadaafadda sideese ayuu u ciribtirayaa ilaha cuntada iyo hoyga ee cayayaanka? Ma leedahay jadwal nadaafadeed ama liis la raaco oo shaqaaluhu u isticmaali doonaan goobaha u furan bannaanka?
6. Waa maxay talaabada aad qaadayso haddii aad cayayaan ka hesho goobtaada? Waa in aad awood u yeelataa in aad xirto dhammaan meelaha duleela ilaa cayayaanka meesha laga saarayo.
7. Ma haysataa khabiir yaqaana la tacaalidda cayayaanka oo aad heshiis kula jirto? Hadday sidaa tahay, u keen magacooda iyo lambarkooda telefoonka waaxda caafimaadka ee deegaankaaga.